



Ref: XRW/OM/PR 00102/11/11

Date: November 23, 2011

Ra'iisul Wasaaraha oo maanta ka qeybgalay Kulan Dood wadaag ah, su'aalaha shacabkana ka jawaabayey

Muqdisho, November 23, 2011-----Ra'iisul Wasaaraha Soomaaliya Dr Abdiweli Mohamed Ali ayaa maanta ka qeybgalay kulan ay soo abaabushay hay'ada CRD oo ah kulan noocii ugu horreeyey ee uu Ra'iisul Wasaare Soomaaliyeed ka qeybgalo isagoo ka jawaabayey su'aalihii ay weydiinayeen ka soo qeybgalayaashii kulanka iyo weliba Qurbo joogta Soomaaliyeed oo si toos ah internet ka ula socda barnaamijka.

Kulankan oo ay soo abaabushay hay'adda CRD ayaa waxaa ka soo qeybgalay bulshada rayidka, oday dhaqameedyada, haweenka iyo bulsho weynta Soomaaliyeed. Ra'iisul Wasaaraha ayaa si toos ah uga jawaabayey su'aalo ay weydiinayeen ka soo qeybgalayaasha iyo qurbojoogta Soomaaliyeed oo ku soo gudbinayey su'aalahooda dhanka internetka, facebook iyo Twitter ka. Xaflad ayaa aheyd mid si heer sare ah loo soo agaasimay oo idaacadaha Muqdisho ay si live ah u tabinayeen barnaamijka oo dhan, isla markaana ay TV-yada Soomaalida ka soo qeybgaleen. Waxaa barnaamijka daadhihinayey Cawil Daahir oo ka socday Universal TV.

Ra'iisul Wasaaraha ayaa marka hore ka warbixiyey xaaladda amniga, horumarka la sameeyey iyo caqabadaha jira. Sidoo kale waxuu ka hadlay waxqabadka Xukuumadda dhanka amniga, isku-xirka maamulada dalka iyo DFKMG ah, maamul wanaaga, la dagaalanka musuqmaasuqa iyo howlaha gar-gaarka bani'aadanimo. Warbixinta Ra'iisul Wasaaraha ka dib waxaa jira dood wadaag ah oo su'aalo lagu weydiinayey Ra'iisul Wasaaraha (Q & A).

Waa markii ugu horreysey ee taariikhda oo mas'uul Soomaalyeed u bareero inuu su'aalaha shacabka dhegeysto kana jawaabo. Arrimaha ugu muhiimsanaa ayaa waxaa ka mid ahaa sidii loo taageeri lahaa ciidanka Booliska oo duruufo adag ku shaqeeya, sidii shacabka uu u bixin lahaa canshuuraha si Dowladdu ay u fuliso adeegyada bulshada, La dagaalanka musuqmaasuqa iyo sababaha keenay in hay'adaha UN ka ay ula soo daahaan mashaariicda, sida saldhigya booliska dayactirkooda oo in muddo ah laga sugayey ka dib ballanqaadyo fara badan.

R'iisul Wasaarahu waxuu u caddeeyey malaayiinkii dhageysanayey oo sida tooska ah ula socday, idaacadaha, iyo internetkaba in Xukuumaddu ay diyaar u tahay inay sii waddo maamul wanaaga, dumarkana door fiican laga siin doono Dowladda, isla markaana la cirib tiri doono musuqmaasuqa oo dhowaan la magacaabayo guddiga ka hortagga musuqmaasuqa oo awood buuxda u leh inay baaraan xitaa madaxda qaranka, in arrimaha amniga la sii wadi doono oo Al-Shabaab laga xureyn doono goobo hor leh oo cusub, iyo arrimo kale oo fara badan oo ay ka mid ahaayeen sidii Qurbojoogta ay kaalmo mug leh uga geysan lahaayeen dib-u-dhiska dalka.

Ra'iisul Wasaaraha ayaa u mahadceliyey ka soo qeybgalayaashii kulanka iyo intii ka dhageysaneysey idaacadaha ama kala socotay internetyada, kana codsaday in la joogteeyo kulamada noocan oo kale ah oo lagula xisaatamayo dowladda. Ra'iisul Wasaaraha ayaa u mahadceliyey CRD iyo Universal, isla markaan codaday in la sii

joogteeyo doodaha noocan oo kale ah oo madaxda iyo shacabku isku wareysanayaan, waxuuna sheegay inay dhammaan tallooyinkii loo soo jeediyey xukuumadda ay ahaayeen kuwo muhiim u ah qaranka soomaaliyeed. Ra'iisul Wasaaraha waxuu ballanqaaday inuu diyaar u yahay in bil walba ay Xukuumadda iyo shacabka isla xisaabtamaan lana joogteeyo doodaha noocan oo kale ah.

---DHAMAAD---

